## QEYBTA CIQAABTA.

**SUM: MGB/DCL/1467/2024** **TR: 08/07/2025**

**Ku: Xeer Ilaaliye ku xigeen C/rashiid Ismaaciil Nuur =Muqdisho=**

**OG: Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka =Muqdisho=**

**UJEEDDO: Ganaax ka dhashay u hogaansanaan la'aan amar Maxkamadeed**

**Garsooraha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

**MARKUU ARKAY:** Gal-dacwadeedka lambarkiisu yahay **MGB/DCL/1467/2024,** oo ay eedeysanayaal ka yihiin: 1. **Saadaq Yuusuf Dhaqane (Koobiyeeste)** Ina Caasho Cabdulle Faarax, 18 jir ah, ku dhashay Deggan B/Weyne. **2. Sakariye Yuusuf Dhaqane (Farey)** Ina Caasho Cabdulle Faarax, 16 jir ah, ku dhashay Daggan B/Weyne. **3. Cabdinaasir Cilmi Cabdi (Tuure)** Ina Dhaqan Axmed Barqadle, 21 jir ah, ku dhashay Daggan B/Weyne. **4. Khadar Saalax Cabdi (Buna)** Ina Xabiiba Cabdi Maaxaay, 18 jir ah, ku dhashay Daggan B/Weyne. **5. Cabdifitaax Muxudiin Cilmi** Ina Anfac Cabdullaahi Xuseen, 21 jir ah, ku dhashay Daggan B/Weyne, **6. Shukri Dhaqane Axmed** Ina Xabiiba Cabdi Maaxaay, 18 jir ah, ku dhalatay Daggan B/Weyne, Lana soo wada Xiray 09/11/2024, kuna eedeysan **Qod: 434/71 iyo 297, 450/1 XCS.**

**MARKUU ARKAY:** Waradda Summadeedu tahay **XXIG/7032/2025,** kuna Tr: **13/05/2025, Ujeedadeeduna tahay Eedeyn** Lid ku ah eedeysanayaasha sare ku xusan, kana soo Baxday Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, kuna Socota Maxkamadda Gobolka Banaadir.

**MARKUU ARKAY:** warqadda Summadeedu tahay **MGB/DCL/1467/2024,** kuna **Tr. 23/06/2025,** kana soo baxday Maxkamadda Gobolka Banaadir, Ujeedadeeduna tahay **Muddeyn Dacwo,** dacwadaasna u baaqatay in Xeer Ilaaliye ku xigeen **Cabdirashiid Ismaaciil Nuur** oo dacwadda ku matali lahaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka uusan soo Xadirin fadhiga Maxkamadda, asiga oo aanan Maxkamadda u soo gudbin wax Cudur-daar ah.

**MARKUU ARAKAY:** warqadda Summadeedu tahay **MGB/DCL/1467/2024,** kuna **Tr. 02/07/2025,** kana soo baxday Maxkamadda Gobolka Banaadir, Ujeedadeeduna tahay **Muddeyn Dacwo,** dacwadaasna u baaqatay in Xeer Ilaaliye ku xigeen **Cabdirashiid Ismaaciil Nuur** oo dacwadda ku matali lahaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka uusan soo Xadirin fadhiga Maxkamadda, asiga oo aanan Maxkamadda u soo gudbin wax Cudur-daar ah.

**MARKUU ARKAY:** **Qod: 95 XHCS,** oo tilmaamayo u hogaansanaan la'aanta Amarada Garsoorka.

**MARKUU ARKAY:** **Qod: 35 ee DKM** oo ka hadlaayo xuquuqda eedeysanaha.

**MARKUU TIXGALIYAY:** Danta Guud ee cadaaladda.

# GO'AANKA GARSOORAHA:

Garsooraha Maxkamadda Gobolka Banaadir asiga oo cuskanaayo asbaabta sare ku xusan waxa uu:

1. Ku ganaaxay Xeer Ilaaliye ku xigeen **Cabdirashiid Ismaaciil Nuur** lacag dhan **$500 (shan boqol oo dollar)**, **Si waafaqsan Qod: 95 XHCS,** Maadaama laba fadhi uusan soo xaadirin fadhiga Maxkamadda, wax cudar daar ah uusan soo gudbin.
2. Faraysaa Xeer Ilaaliye ku xigeen **Cabdirashiid Ismaaciil Nuur** in uu ku bixiyo lacagta ganaaxa ah, Muddo **15 Maalin (shan iyo Toban Maalin)** gudahood, oo ka bilaabaneyso maalinta Go'aankaan soo baxay, kuna shubo Qasnadda Dowladda.
3. Go'aankaan waxaa la gaaray Maanta oo ay **Tr. 08/07/2025.**

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Daahir Xasan Maxamed**
**Garsooraha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

**Publicrelations@mgb.gov.so Tell:+25770500880/ Tell: +25770500881**
**Address :HQ Office, H.Weyne District, London Road ,Mogadishu, Somalia.**